Federal Parliament of Somalia
House of the People

البرلمان الفيدرالي الصومالي
مجلس الشعب

Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya
Golaha Shacabka

Xafiiska Xil Abdifatah Ismael Tahir

5th August, 2019

KHATARAHA KA IMAN KARA XAYIRAADAHA DUULIMAADYADA KISMAYO

Hay'adda Duulista Hawada, iyadoo fulineysa amar kasoo baxay Xukuumadda Federaalka Soomaaliya, waxay 29kii August 2019 soo saartey wareegto heer caalami ah (NOTAMN) oo ay ku fareyso dhammaan duulimaadyada ku socda ama ka imanaya Kismayo in ay Muqdishu soo maraan. Ma jirto sabab maan-gal ah oo ay xukuumaddu u cuskatay tallaabadan. Waxase iska cad in amarkani jawaab u ahaa go'aankii Maamul Goboleedka Jubaland ku hakiyay muddo sadex beri ah duulimaadyadii kusoo waajahnaa Kismayo sababo la xiriira amniga ka dib markii ay soo baxday in xoogag shisheeye oo taageersan Dawladda Federaalka ah ay si baalmarsan xayndaabka heshiiska wada shaqaynta AMISOM ugu soo daabuli rabeen Kismayo ciidamo si gaar ah u tabobaran oo loogu talo galay in ay baajiyaan doorashada halkaa ka socotay.

Maalmihii ina soo dhaafey waxaan si dhow ugu kuur galay bal in la heli karo jid xukuumaddu uga noqon karto go'aankan is-miidaaminta ah laakiin may suuro gelin waxaana lagama maarmaan noqotay in aan umadda Soomaaliyeed iyo daneeyayaasha caalamiga ahba la wadaago aragtideyda ku aadan khataraha ka iman kara go'aankan guracan. Khatarahaas waxa ka mid ah qaar maamul, qaar siyaasadeed, qaar dhaqaale, iyo qaar banii'aadanimo.

MAAMULKA HAWADA

Aan ku horeeyo kuwa maamul oo gobanimada taabanaya, dalkeenu wuxuu dedaalo badan u galay lasoo noqoshada maamulka hawadiisa oo muddo ku dhow 30 sanno Hay'adda Caalamiga ah ee Duulista Hawada ICAO ay ka maamuleysay magaalada Nairobi ee dalka Kenya. Intii dedaaladaasi socdeen waxay Hay'ada ICAO iyo taageerayaasheeda beesha caalamkuba mar walba ku doodi jireen in aynaan weli siyaasad ahaan iyo farsamo ahaanba u diyaarsaneyn lasoo noqoshada maamulka hawadeena. Go'aanka Xukuumadda Federaalka ay ku xayireyso duulimaadyada tegaya iyo kuwa ka imanaya magaalada Kismayo wuxuu u adeegayaa doodii ICAO ee ahayd Soomaalida laguma aamini karo maamulka hawo ay maraan duulimaadyo tiro badan oo calami ah. Haddii si kale loo dhigo, tallaabooyinka maamulkan hadda jooga uu qaadayo waxay u muuqdaan qaar keeni kara halis dib loogu celiyo hawada Soomaaliya gacmo shisheeye.

DIB-U-DHACA SIYAASADEED

Siyaasad ahaan haddii dawladda Soomaaliya ay maamulka Hawada u isticmaasho culeys siyaasadeed oo ka dhan ah ciddii ka ra'yi duwan, taasi waxay sababi kartaa in qaar badan oo maamul goboleedyada ka mid ahi ay xayiraad ku soo rogaan cidii u hogaansanta amarka xukuumadda oo ka talisa dhul aad u

kooban. Is-maan-dhaafka noocan oo kale ahi wuxuu halis gelinayaa soo kabashada aynu siyaasad ahaan ka sameynayno burburkii dawladeed ee laga dhaxley colaadaha daba dheeraaday ee dalkeena ragaadiyay maadaama uu horseedayo kala go' iyo kala qo-qob hor leh oo ku yimaada waxa yar ee ka haray iskaashiga iyo is-aqoonsiga maamul goboleedyada iyo dawlada dhexe. Intaas waxa dheer in arintani hakad ku keeni karto iskaashiga horumarineed ee aynu bulshada caalamka la leenahay maadaama aysan deeq-bixiyayaal badan u suuro geli doonin kormeerida mashaariicda ay maal-geliyaan.

KHASAARAHA DHAQAALE

Ka sokow dhaawaca siyaasadeed iyo ka horumarineed ee aan kor ku xusay, xayiraadaha duulimaadyadu waxay culeys weyn oo dhaqaale ku tahay shariikadaha maxaliga maadaama diyaarada Doolow ka imaneysa ee Kismayo u socotaa ay masaafo dheer oo aan loo baahneyn dib ugu noqoneyso Muqdishu. Marka laga reebo in culeys dhaqaale iyo mid waqti uu fuulayo shirkadaha diyaaradaha oo markii horeba la kacaa-kufayay adeegyada duulimaad ee ay bixiyaan, waxa xusid mudan in shirkaduhu qeyb ka mid ah qarashkan dul socodka ah u gudbinayaan macaamiishooda. Taa micneheedu waxa weeye rakaabku waxay bixinayaan nowli (fare) aad uga badan kii ay hore u bixin jireen iyadoo aan la wada socono xaalada liidata ee dhaqaalaha dalkeena.

XAALADA BANII'AADANIMO

Mida lagaba yaabo in ay ka wada darantay khataraha aan kor ku xusay ee xayiraada diyaaradaha ka dhalan kara waa dhibaato ban'iidaanimo. Waxaan shaki ku jirin in xayiraadaha noocan ah ay halis galin karaan dhaqdhaqaaqa hawlaha gargaarka ee ka socda degaamada ku xeeran Kismayo oo ay ka jiraan xaalado qalafsan oo ka dhashay hawl-galada ka dhanka ah ururada argagixisada ee gaboodka ka dhigtey qaar ka mid ah degaanada Jubaland. Waxa iyana fiiro gaar ah mudan in mar kasta oo uu adkaado isu socodka gaadiidka cirka ee degaanada Jubaland, ay sidoo kale adkaaneyso in khubarada gargaarku ay helaan macluumaad ama qiyaas sax ah oo ku saabsan xaaladaha banii'aadanimo ee sida lama filaanka ah isu bed-bedela taasina ay sababi karto bara-kac la baajin kari lahaa haddii aysan jirin xayiraadaha noocan oo kale ah. Waxaa taas dheer in gobolka aysan ka jirin xarumo caafimaad oo tayo leh sidaa daraadeedna dad badan oo bukaan ah loo qaado meelo ay ka mid yihiin dalalka jaarka ah ama magaalooyinka waaweyn ee dalka sida Muqdishu. Waxa iska cad in xayiraadaha duulimaadyadu ay dadkaa ku keeni karaan kasii dar xaaladooda caafimaad amaba qudh go' laga badbaadin kari lahaa Alle idamkii.

GUNAANAD

Gebogebadii, go'aanka lagu xiyirayo duulimaadyada Kismayo ma aha mid wax yeelaya maamulka Jubaland balse waa mid ciqaab wadareed iyo dhibaato weyn ku ah muwaadiniinta Soomaaliyeed ee ka soo jeeda degaanadaas. Sidoo kale waa go'aan astaan su'aaleed saaraya lasoo wareegida maamulka hawada Soomaaliya oo sharcigii sahli lahaa uu hadda horyaalo Golayaasha Baarlamaanka. Iyadoo la garan karo in ay adagtay in si xirfadnimo leh (professional) loola shaqeeyo xukuumadda hadda jirta, haddana waa in hoosta laga xariiqo muhimadda ay leedahay in aan Hay'adaha halbawlaha u ah bixinta adeegyada dawlada dhexe, sida hagida diyaaradaha, aan loo adeegsan ujeedooyin ama dano gaar ah oo ay leeyihiin shaqsiyaadka hadda talada hayaa. Waxaan Xukuumadda Federaalka

Soomaaliya ugu baaqayaa in ay ka noqoto go'aankan si dalkeena aan uga baajino kala go' iyo kala qo-qob oo ay wada hadal ku dhameyso khilaafaadka u dhexeeya iyada iyo maamul goboleedyada. Waxaaan sidoo kale ku boorineynaa maamul goboleedyadu in ay muujiyaan tanaasul dheeraad ah si looga baaqdo qalalaase siyaasadeed oo ka dhasha qar-iska-xoorka xukuumadeena.

Dr Abdifatah Ismael Tahir

Guddoomiyaha Guddiga Duulista Hawada, Gaadiidka, Waddooyinka, Dekedaha, iyo Tamarta ee Golaha Shacabka Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya **ahna** Guddoomiye Ku Xigeenka Siyaasada iyo Istiraatijiyada ee Xisbiga UPD.

Fiiro Gaar Ah: Qoraalkan cid kuma metelo, xisbi iyo guddi toona, ee waa aragtideyda shaqsi ee xildhibaanimo.